Tani waxay khuseysaa qof kasta oo ku nool ama booqda Halland inta lagu jiro musiibada

Waxaa jira xeerar ay tahay inaad raacdo

Qof kasta oo ku sugan Iswiidhan wuxuu mas'uul ka yahay inuu san fidinin COVID-19.

Tani waxay khuseysaa dadka iyo ganacsiyada labaduba.

- Joog guriga haddii aad leedahay calaamado
- Kaliya la kulan dadka aad la nooshahay, ama saaxiibo kooban
- Ka fogow dadka kale, ka fogow dadka badan
- La soco dhaqamada xakameynta caabuqa si aad ugu badbaado safarka
- Ku shaqee guriga sida ugu badan ee aad kari karto
- Si fiican oo joogto ah u dhaq gacmahaaga

Macluumaad ku saabsan cudurka COVID-19

Websaytka Wakaaladda Caafimaadka Dadweynaha ayaa ku siinaya macluumaad ku saabsan COVID-19 iyo waxaad ka qaban karto si aad isaga ilaaliso inaad qaadsiiso cudurka ama aad u qaadsiiso kuwa kale.Macluumaadka waxaa lagu heli karaa luqado badan

Macluumaadka ku saabsan COVID-19 oo ku qoran luqado kale websaytka Wakaaladda Caafimaadka Bulshada

Iska baar COVID-19 haddii aad leedahay calaamado

Samee ballan si laguu baaro haddii aad leedahay calaamadaha COVID-19.Baaritaanku waa lacag la'aan.

Dadka leh lambarka aqoonsiga shaqsiyadeed iyo aqoonsiga elektaroonigga ah

Adiga ayaa baaritaan isku sameyn kara rugta gaarka ah ee is-baarida.Waa inaad ballan samaysato

Sida ballan looga dhigto is-baaritaanka

1. Gal 1177.se.

Dadka waaweyn
Gal 1177.se - Is-baaritaanka COVID-19

Mas'uulka carruurta da'doodu tahay 6-12 sano
Riix magaca ilmahaaga kadib markaad gasho. Xullo Dhamaan adeegyada kale kadibna Buuga is-tijaabinta COVID-19
Gal 1177.se - Is-baaritaanka COVID-19
Dhallinyarada da'doodu tahay 13-17 sano
Gal 1177.se - Is-baaritaanka COVID-19

2. Dalbo baaritaanka.
3. Xulo goobta baaritaanka
4. Ballan samee.

Sidee is-baaritaanku u shaqeeyaa

1. Haddii aad awoodid, u kaxee gaarigaaga xarunta baaritaanka, haddii kale raac baaskiil, soco ama isticmaal habab kale oo gaadiid ah meesha aad keligaa joogto.
2. Shaqaalaha ama calaamadaha ayaa kuu sheegaya meesha lagu sugayo.
3. Waa inaad keentaa aqoonsi ansax ahSidoo kale waa fikrad wanaagsan inaad keento gacmo nadiifiye, tiish iyo muraayad yar, haddii aad mid leedahay.
4. Haddii aad baabuur waddo, shaqaaluhu waxay ku siin doonaan xirmada saamballada daaqadaada gaariga furanHaddii aad ku timid baaskiil, lug, ama wax la mid ah, baaritaanka waxaa lagu sameeyaa banaanka.

Sida loo helo natiijooyinka baaritaanka

Waxaad ku heli doontaa natiijooyinka maalmo gudahood adoo adeegsanaya e-adeegyada Daryeelka ee 1177.Joog guriga inta aad sugeyso natiijada baaritaanka.Haddii calaamadahaagu ka sii daraan yihiin, wac 1177 si aad talo u hesho ama la xiriir rugta caafimaadkaaga.Cudurka degdega ah, wac 112.

Dadka aan haysan lambarka aqoonsiga shakhsiga ee Sweden ama aqoonsiga elektaroonigga ah

Haddii aadan haysan lambar aqoonsi oo iswiidhish ah, aqoonsi elektaroonig ah, ama haddii aadan ballan ka sameysan karin 1177.seSababo kale awgood, waxaad wici kartaa Pandemimottagningen (Kiliiniga cudurka Faafa) 010-476 19 13 si aad u tijaabiso.Halmstad iyo Varberg waxaa ku yaala kiliiniga cudurka faafa.Sidoo kale hataa xiriir Xarun caafimaad oo laga caawiyo baaritaanka.

- Baaritaanka waxaa lagu sameeyaa rugta faafida ama xarunta caafimaadka
- Waa inaad keentaa aqoonsi ansax ah
- Qof ayaa kaa caawin doona inaad sameyso baaritaanka.Baaritaanka waxaa laga qaadayaa cunaha iyo sanka
- Baaritaanku waa lacag la'aan

Sida loo helo natiijooyinka baaritaanka

Rugta caafimaadka ee aad baaritaanka ku sameysay ayaa kula soo xiriiri doona natiijada baaritaanka.Waxay soo wici doonaan oo keliya haddii baaristu muujiso inaad leedahay COVID-19.Waxaad ku heli doontaa natiijooyinka 3 maalmood oo shaqo gudahood.Joog guriga inta aad sugeyso natiijada baaritaanka.Haddii calaamadahaagu ka sii daraan yihiin, wac 1177 si aad talo u hesho ama la xiriir xarunta caafimaad.Cudurka degdega ah, wac 112.

Hadaad jirantahay oo aad ubaahantahay daryeel

Markii aad u baahan tahay daryeel, la xiriir rugtaada caafimaadka si aad ballan uga qabsato.

Haddii aad leedahay astaamaha COVID-19, fadlan la xiriir rugta caafimaadka ka hor intaadan imaan.

Haddii aad u baahan tahay daryeel degdeg ah wac 112.

Xarumaha caafimaadka ee Halland

Talaalka COVID-19

Tallaallada waxaa la bixin doonaa laga bilaabo dhammaadka Diseembar waxayna sii socon doontaa in laga bixiyo dhammaan Iswiidhan sannadka 2021.Tallaalku waa lacag la'aan kuwa ugu badan ee u baahan kahortagga cudurrada halista ah ayaa marka hore la tallaalayaa.

Qorshaynta hada waxay socotaa sida talaalada loogu bixin doono Halland. Macluumaadka la cusbooneysiiyay waxaa laga heli karaa 1177.se/Halland

Talaalka COVID-19

Baaritaanka unugyada difaaca jirka wuxuu muujinayaa haddii aad qaadatay COVID-19

Haddii aad caafimaad qabto, ka weyn tahay 18 jir, oo aadan qabin hargab, qandho, ama astaamo kale oo ah COVID-19 ugu yaraan 14 maalmood, waxaad ballan ka sameysan kartaa baaritaanka unugyada difaaca jirka.Baaritaanku wuxuu muujinayaa haddii aad yeelatay unugyada difaaca jirka, taas oo macnaheedu yahay inaad xoogaa difaac ah ka haysato inaad ka bukooto COVID-19 markale.

Waxaad ubaahantahay inaad kadhigato balan rugta caafimaadka si aad iskaga qaado baaritaanka unugyada difaaca jirka.Baaritaanku waa 200 karoon.